



Soo baxay: 10^{kii} July 2018

Warbixinta Roobabka Xilligii Guga ee 2018.

Roobkii Guga oo curtay dhamaadkii Bishii February ee sanadkan (2018) kaasoo horaantiisi si fiicana uga bilaabmay dhinaca gobolada galbeedka ee dalka. Dhanka kalena dhamaadkii bishii April iyo bilowgii bishii May, Waxaa roobab aad u farabadan ka da'een dhamaan Goboladda dalka oo dhan.

Roobkaas da'ay oo noqonaya kii ugu xaddiga badnaa marka loo eego roobabkii hore ee sanadihii la soo dhaafay, kaas oo gebi ahaanba ka wada da'ay dalka oo dhan Guban illaa Oogo aadna loogu diirsaday.

Dhanka kale roobkan oo lagaga nastay abaartii baahsanayd ee ku habsatay dalka sanadihii la soo dhaafay, ayaa waxaa dhinaca kale khasaare weyn ka soo gaadhay dadka iyo deegaanka reer Somaliland gaar ahaan Gobolada galbeed iyo dhulka Xeebaha ah, oo ay ku dhufatay Duufaantii **SAGAR**, taa soo sababtay khasaare Nafeed, mid Maaliyadeed iyo mid Deegaanba.


Sida ka muuqata qariirada sare ee Somaliland (kahriidada 1 aad) waxay ina tusaaysaa in dhulka oo dhan meelaha roobku ugu badnaa oo xaddigiisu gaadhay ugu sarayn **450 mm** — **500 mm**, oo ah barri iyo galbeedba, sidoo kale meelaha uu ugu yaraa oo gaadhay, **50 mm** — **100 mm** roobabkii xilligii Guga oo dhan bishii **March** — **June 2018**.

Sidoo kale xogta garaafka ah ee hoos ku muujisani waxay ku tusaysaa Qiyaasta roobabkii sanadkan ee xilliga Guga oo la barbardhigay qiyaasta celceliska xog mudo 30 sano ka hor laga qaaday celceliskeedii , gaar ahaan 12 xarumood oo ka mida xarumaha saadaasha Hawada ee waqtigaa fog illaa iminka shaqeeya. Calaamadda Buluuga waxay u taagan tahay xogta roobabkii Guga ee sanadkan **2018**. Halka Calaamadda casaanka ahina ay muujinaysa xogta celceliska 30 sano ka hor oo mid kasta la barbar dhigay tii ay lahayd, oo ah xaruntii xogta laga keenay, la iskuna aadiyey si loo ogaado qiyaasta ay is dheeryihiin.

Guud ahaan, mudadii xogtan la ururinayey cabirka roobabka ee ay xarumaha Saadaasha Hawadu soo gudbiyeen oo ahaa roob aad xaddigiisu u badan yahay. Meelaha ugu roobabka badan waxaa ka mid ahaa kuwan hoos ku xusan:

Balligubadle (**512mm**), Laaso dacawo (**454 mm**), Magalocad (**439 mm**), Boorama (**335 mm**),dhubato (**332 mm**) , Elafwayn (**313.5 mm**), Gacan-Libaah (**296 mm**), Aburiin (**249.5mm**), Hargeysa (**245mm**), Qulujeed (**244.5 mm**), Garbo-dadar (**223 mm**), Aynabo(**220 mm**), Wajaale (**219.5mm**), Gebiley (**215.5mm**), Botor (**213.5 mm**) sheikh (**212 mm**)Gar'adag (**203 mm**), Oodweyne (**202 mm**).


Deegaamada kale ee ay roobabka fiicani ka de'een waxaa ka mid ah kuwan ; Dilla, Baki, Cadaadley, Lughaya, Laascaanood, Ceerigaabo, Malowle, Allaybadey, Salaxley, Dararweyne, Xudun iyo Beer.



Khariidada 1 Wadarta roobabkii xilliga Guga ee March –June 2018

Jadwalka 1:Qariiradani wuxuu muujinaysaa xaddiga roobka ee xilligii

Station	Gu Total Rainfall-2018	Station	Gu Total Rainfall-2018	Station	Gu Total Rainfall-2018
Borama	335	Dararwayne	97	Elafwayn	313.5
Dilla	171	Cadaadley	155	Xudun	84
Gebiley	215.5	Dhubato	332	maloowle	121
Hargeisa	245	Baligubadle	512	Alleybadey	121
Aburin	249	Wajale	219	M.cad	439
Quljeed	244.5	Sheikh	212	Sallexley	120
Berbera	64	Warabeye	51	Baki	164
Burao	63	Gacan-libah	296	L.canod	152
Odweyne	202	Botor	213	Garadag	203.5
Aynabo	219.5	Lughaya	153	Tuurka	127
Erigavo	129	Zaila	-	Lasadacawo	454
Beer	85	Gatiitaley	111	Garbo-dadar	223



Wixii faahfaahin dheerada ee ku saabsan xogta cimilada iyo roobabka Somaliland Fadlan kala soo xidhiidh Wasaaradda Horumarinta Beeraha Tell: 4423792, 4243105 & 4247578 Email: jfgalaydh@gmail.com. Or d.g_moa@hotmail.com ama booqo Ciwaanka [http:// www.slmoad.com](http://www.slmoad.com)